

Ka hadal barbaarinta

Wax suaal ah miyaad ka qabtaa sharciga cusub amma aad u baahantahay ka hadalka barbaarinta, waxaa la hadlikartaa kalkalisada caafimaadka, shaqaalaha xannaad maalmedka (vuggestuen), shaqaalah xananada caruurta (børnehaven), Macalinka fasak ee dugsiga, dhaqtar cadiga ah.

Waxaa kale oo aad xaq u leedahay talabixin daahsan maamulka sooshalka (socialforvaltning), la taliyaha cilmi nafsiga ee dugsiga.



Ololeynta macluumaadka „Nej Til Bank“ oo ah wada shaqayn ka dhaxaysa Talabixinta dhallanka iyo ururka ku baahsan dalka Daryeelka caruurta.



La talinta dhallaanka (Børnerådet),
Vesterbrogade 35A
1620 København V
Tlf. 33 78 33 00
www.brd.dk
brd@brd.dk



Denne folder er udgivet med støtte fra Sygekassernes Helsefond

Somali



Waalidiintu Maa madilikaraan caruurtooda

Walidiintu waa inay barbaariyaan caruurtooda iyaga aan dilin

Ilmahaaga inaad disho, ayaa hadda mamnucaya sharciga u yaal Denmark. Baarlamaanka, ayaa 1997 wuxu dhaqangeliyay, in waalidiintu ay dilin caruurtooda. Sharciga wuxuu farayaa:

Inay Ilmuhu xaq u leeyihiin xanaayo iyo daryeel. Waa in loola dhaqmaa si xushmadi ku jirto, naf ahaantiisana inaan la marin Iqaab dil ah loona macaamilin si uu qoonsado.

Sharciga nr. Yahay 416 oo soo baxay 10 bisha juun 1997 dii ku saabsan waalidka masuulka ka ah caruurta iyo ka xaqa booshada lehba, qodbka 2, tirsigiisu yahay 2.

Waagii hore, waxaa caadi ahaa in lagula kaco dilk marka la abaabinayo caruurta. Dadka waawayn, ayaa sidaa oo kale caadi ahayd in la mariyo ciqaabta noocasi ah maalinkasta. Sikastaba ha ahaatee, Ciqaabta dilka ayaa hatan sharigu mamnuncayaa.

Caruurta, sikastaba a ahaatee, waxaa ka soo gaara dhaawac marka la dilo. Haddii ay noqoto ciqaabta dilka qayb caadi oo ka tirsan barbaarinta, waxay ku hogaaminaysaa, in caruurta dhib wayn ka soo gaaro isku kalsoonaantooda amma asagaba uu noqdo ka wax dila. Waxay kala oo ay baa`bi`iynsaa xiiirka ka dhaxeeya waalidka iyo caruurta, haddii hooyada amma aabaha – qofka caruurta ay maqsuudka ku yihiin – uu kula kaco ciqaabta dilka. Caruurta, waay leeyihiin xaq wayn oo la mid ah sida ka dadka waawayn si ay ugu noolaadaan daryeel wanaagsan. oo ka xur ah ciqaabta dika.

Raadraaca taariikh, ayaa waxay tusaysaa:

1911: Jirdilka maxaabiista, ayaa la mamnuucay.

1920: Waxaa laga mamnuuca ragga/ninka inay dilaan xaasaskooda iyo dadka shaqaalahooda ah.

1967: Macalimiinta ayaa laga mamnuucay inay garaacaan ardadooda.

1997: Walidiinta, ayaa laga mamnuucay inay garaacaan caruurtooda.

Xeerkan cusub, ayaa wuxuu siiyay caruurta xaq la siman oo ka badbaadiya ciqaabta dilka ah, sida dadwaawayn ay u so Mareen waayadii hore.

Maxaa loo barbaariyaa dil la`aan?

Haddi aan nahay waalidiinta, waan jecelnahay caruurteena. Isla markaana waxaan u samyanaa wixii u wanaagsan. Haddii aan dilno, sababtu waa, inaga oo u aragna inay lug ku leedahay barbaarinta. Waalidiinta qaar ka mid ah ayaa waxa caadi u tahay inay kula kacaan ciqaabta dilka, halka ay qaarka kalana ay kaba fogyihiin. Mashquulka joogtada ah iyo degdega ayaa keena inuu dilku yahay wadada ugu dhaw, mise sababta aan u dilnaa, waxaan inaan tusno ka awooda leh.

Is-dhaafsiga xushmada, ayaa kobciya i soo dhawaanshaha iyo jacaylka iyo wadhadalka

Waxaa suuragal ah inay waalidiintu barbaariyaan iyaga oo wax dilin, taasi ayaana sharciga cusub lagama maarmaan u ah in la illaaliyo. Inkasta oo ay hadda mamnuuc tahay in wax la dilo, waxaa jiro qaab kale oo loo tusikaro caruurta, qofka awooda leh. Haddi uu qofku waalika ah doonaya inay is-dhaafsadaan xushmad caruurtiisa, waa inuu la yimaadaa ereyo xambaarsan jaceel iyo i soo dhawaansho, laakiin u la imaanin dil iyo wax la mid ah.